



**STATE OF WASHINGTON**  
**DEPARTMENT OF SOCIAL AND HEALTH SERVICES**  
**Aging and Long-Term Support Administration**  
**PO Box 45600, Olympia, WA 98504-5600**

Janaayo 8, 2021

**KU:** Dadka adeegyada bixiya

**KA:** Bill Moss, oo ah kaaliyaha Xoghayaha  
Maamulka arimaha da'da iyo taageerada Muddada Dheer

**MAWDUUCA:** Qaadashada tallaalkaaga COVID-19

Waaxda Caafimaadka ee Gobolka Washington (Washington State Department of Health, DOH) waxay ku dartay shaqaalaha daryeelka muddada-dheer, oo ay ku jiraan shaqaalaha daryeelka guryaha, inta lagu gudajiro Wajiga 1A ee qorshaha qeybinta tallaalka COVID-19. Tan macnaheedu waa in aad xaq u leedahay inaad ka mid noqoto wajiga koowaad ee tallaallada laga bixin doono Washington.

Shaqaaluhu waxay u baahan doonaan inay bixiyaan **mid** ka mid ah dukumiintiyada xaqiijinta oo ay u gudbin doonaan maamulaha tallaalka:

**1) Natiijooyinka sahaminta ee ka socda websaydka PhaseFinder:** [www.findyourphasewa.org](http://www.findyourphasewa.org)  
DOH waxay samaysay websaytka PhaseFinder si ay uga caawiso shaqsiyaadka inay aqoonsadaan wajiga qaybinta tallaalka Washington ee ay xaq u leeyihiin. Shaqaaluhu way buuxin karaan 8-da su'aalood ee ku dhexjira PhaseFinder ka dibna waxay ka qaadi karaan Sawir-shaashaddeed ama way daabacan karaan natiijooyinkooda si ay ugu adeegsadaan xaqiijin ahaan.

Fadlan la soco in DOH ay tixgelinayso meel kasta oo shaqaale daryeel-guri ay daryeel ku siinayaan goob daryeel caafimaad, waxayna ula jeedaa kuwa bixiya taageerada daryeelka sida *shaqaale* caafimaad guri, si loo hubiyo in dhammaan in shaqaalaha daryeelka guriga ay u helaan tallaalkan

**2) Warqadda xaqiijinta ee ka socota Waaxda Adeegyada Bulshada iyo Caafimaadka (Department of Social and Health Services) ama Hay'adda Daryeelka Guriga**  
Waaxda Adeegyada Bulshada iyo Caafimaadka (Department of Social and Health Services, DSHS) waxay ku siinaysaa warqad xaqiijin ah oo ay ku jirto warqaddan. Haddii aad lumiso warqaddaada xaqiijinta oo aadan u shaqeyn Hay'adda Daryeelka Guryaha, waxaad heli kartaa nuqul dheeraad ah oo warqaddan ah adiga oo booqanaya [www.seiu775.org](http://www.seiu775.org).

Haddii aad u shaqeysid Hay'adda Daryeelka Guryaha oo aad u baahan tahay in lagu bedelo warqadda xaqiijinta, waxaad u baahan doontaa inaad la xiriirto Hay'adda Daryeelka Guriga ama aad u adeegsato websaydhka PhaseFinder si aad u bedesho.

### ***Goobaha Bixiyaha Tallaalka***

Habka uu doono ha noqdo nidaamka xaqiijinta ee aad doorato, waxaad u baahan doontaa inaad soo booqato <https://www.doh.wa.gov/YouandYourFamily/Immunization/VaccineLocations> si aad aragto goobaha ka tirsan gobolkaaga ee laga maamulo tallaalka. Websaydhku wuxuu ku siin doonaa liiska goobaha, waxaadna u baahan doontaa inaad la xiriirto goob si aad ballan u sameysato.

Fadlan ka hubi bixiyaha tallaalkaaga si aad u xaqiijiso nooca dokumentiyada aad u baahan tahay inaad soo qaadato ballantaada.

### ***Xog dheeraad ah oo ku saabsan tallaalka.***

Tirada isticmaalka tallaalka ee Washington way xadidan tahay waqtigan, laakiin waxay sii wadi doontaa inay kordhiyaan toddobaadyada soo socda iyo bilaha soo socda. Waxaa laga yaabaa inaad u baahato inaad xiriiryo badan la samayso meelaha maxalliga ah ee lagu qaybinayo si loo helo tallaalka. In kasta oo shaqaalaha daryeelka guryaha oo dhami ay si adag uga fiirsadayaan qaadashada tallaalka, kuwa ka shaqeeya guriga in ka badan hal macmiil ama ka caawiya macaamiisha hababka soo saarista aerosol waxay halis sare ugu jiraan inay qaadaan xanuunka COVID-19.

Waxaan kaaga mahadcelinaynaa dadaalkaaga inaad bixiso taageerada iyo adeegyada, waxaanna sameyneynaa wax kasta oo aan awoodno si aan u hubino adiga iyo kuwa aad caawisoba in lagu ilaaliyo sida ugu macquulsan. Si aad u ogaato macluumaad dheeri ah oo ku saabsan booqo [www.doh.wa.gov/Emergencies/COVID19/vaccine](http://www.doh.wa.gov/Emergencies/COVID19/vaccine).

### ***Nuqulada turjuman ee warqadan waxa laga heli karaa oonleenka***

#### **English**

Please visit <https://www.dshs.wa.gov/altsa/information-providers-and-long-term-care-professionals> for more information, including materials in other languages.

#### **Russian**

Пожалуйста посетите <https://www.dshs.wa.gov/altsa/information-providers-and-long-term-care-professionals> для получения дополнительной информации, включая материалы на других языках.

#### **Vietnamese**

Xin vui lòng truy cập <https://www.dshs.wa.gov/altsa/information-providers-and-long-term-care-professionals> để biết thêm thông tin, bao gồm các tài liệu của những ngôn ngữ khác.

#### **Tagalog**

Bisitahin ang <https://www.dshs.wa.gov/altsa/information-providers-and-long-term-care-professionals> para sa karagdagang impormasyon, kalakip ang mga materyales para sa ibang lenguahe.

**Chinese**

请访问 <https://www.dshs.wa.gov/altsa/information-providers-and-long-term-care-professionals> 了解更多信息, 这个链接包括其他语言.

**Korean**

<https://www.dshs.wa.gov/altsa/information-providers-and-long-term-care-professionals> 를 방문하면 다른 나라 언어로 된 자료를 포함해서 더 많은 정보를 얻을수 있습니다

**Somali**

Fadlan booqo <https://www.dshs.wa.gov/altsa/information-providers-and-long-term-care-professionals> waxii macluumaad ee dheeraad ah, oo ay ka mid yihiin warbixino ku qoran luuqdo kala duwan sida afsomaliga.

**Spanish**

Por favor visite <https://www.dshs.wa.gov/altsa/information-providers-and-long-term-care-professionals> para mas información, incluyendo materiales en otros idiomas

**Laotian**

ກະລຸນາເຂົ້າໄປທີ່ <https://www.dshs.wa.gov/altsa/information-providers-and-long-term-care-professionals> ສໍາ າ ລັ ບຂໍ້ມູນເພີ່ ມເຕີ ມ, ລວມທັ ງເອກະສານທີ່ ເປັ ນພາສາອັ ັ ນງ.

Si daacad ah,



Bill Moss, Kaaliyaha Xoghayaha  
Aging and Long-Term Support Administration (Maamulka Waayeelka iyo Taageerada Mudada Dheer)  
Department of Social and Health Services  
*NHormarinta Nolosha*